Danish Refugee Council
Lyngbyvej 100
Indgang: Asyl og repatriering
DK 2100 Copenhagen Ø
Denmark

T: +45 3373 5000

drc@drc.ngo
www.drc.ngo

## Carruurta aan lala socon iyo heshiiskii Dublin

Ma tahay ilmo yar? oo ma laguu diiday inaad Danmark ku soo gasho heshiiska magaalada Dublin, inkasta oo aad ehelo ku leedahay dalkaan? waad caban kartaa diidmadaas ee kala xidhiidh hayàdda kaalmaynta qaxootiga wixii macluumaad dheeraad ah.

Marka ay caruur magan-galyo soo codsadaan iyagoo aysan wehlin waalidkood ama cid kale oo masùul ka ah, waxaa loogu yeedhaa caruur wehel laàan ah.

Waxaa ku xussan heshiiska Dublin, in caruurta wehel laàanta ah lagu qaado codsigooda wadanka yurub ee ehel ama qaraabdoodu ay ku deganyihiin si sharci ah, hadii ay caruurta maslaxadoodu ku jirto. Qoyskaasi wuxuu noqon karaa waalid, walaalo, habaryar/eedo, abti/adeer ama ayeeyo iyo awoowe.

Tani waxay ka dhigan tahay in wadamada Midowga Yurub ay cugsan karaan Xeerka Dublin si ay ula midoobaan carruurta aan lala soconi xubnaha qoyska ama qaraabadooda.

Tusaale waxay noqon kara in ilmo aan lala socon uu magan-galyo ka codsado Giriiga, iyada oo ay waalid, walaalo ama qaraabo u joogaan Danmark.

Hadii ay xaaladdu sidaas ay noqoto, mas'uuliyiinta Giriiggu waxay ka codsan karaan Hay'adda ajaanibta Danmark inay la wareegto mas'uuliyadda kiiska magan-gelyo ee ubadkaas si ay ugu ogolaato ilmuhu inuu yimaado Danmark.

Haddi ay Hay'adda Ajnebigu diido inuu ilmuhu yimaado Danmark, ilmuhu rafcaan ayuu ka qaadan karaa.

**Sideen racfaan uga qaataa?**

Hayàdda kaalmaynta qaxootiga deenishu waxay ku caawisaa latalin bilaash ah iyo matalaad dhammaan magangalyo-doonyaasha nidaamka Dublin ee deenishka, kuwaas oo doonaya in ay rafcaan ka qaataan go'aanka ay gaadhay hay`adda ajaanibtu.

Sida caadiga ah, magangelyo-doonaha hore u degganaa Danmark oo keliya ayaa rafcaan ka qaadan kara go'aanka Dublin ee ay gaadho Hay'adda ajaanibtu.

Laakiinse, waxaa suurtogal ah in carruurta aan lala soconin ay racfaan ka qaataan haddii ay magangelyo ka codsadeen waddan kale oo Midowga Yurub ah oo ayna Hay'adda ajaanibtu u diidday inay yimaadaan Danmark si ay ula midoobaan xubnaha qoyska ama qaraabadooda Danmark.

xaaladdan oo kale, ilmaha waxaa lagu wargaliyaa in ay u furanhay rafcaan ka qaadashada diimada iyo in uu caawimaad ka heli karo hayàdda kaalmaynta qaxootiga. Waana muhiim in ilmuhu sida ugu

dhaqsaha badan u racfaan u qaato 7 maalmood guduhood laga bilaabo marka ilmuhu uu helo go'aanka diidmo ee Hay'adda ajaanibta.

kaLa xiriir hayàdda kaalmaynta qaxootiga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan talooyinka sharciyada iyo matalaadda carruurta aan lala socon ee heshiiska Dublin. Waxa nagala soo xidhiidhi karaa **advice@drc.ngo** ama telefoon +45 33735000.